



## Barnaamij Lagu Maareeyo Ranjiga Haraaga ah

Sannad kasta ugu dhawaan 850 milyan oo gallon oo ranjiga nashqadeed ah ayaa lagu iibiyaa Maraykanka. Ma og tahay in boqolkiiba 10 aan la isticmaalin oo ay diyaar u yihiin dib-u-warshadeyn?

Sharciga xilka hawlaha ranjiga wuxu farayaan in wershada sameeya ranjigu ay kobciyan barnaamij maaliyadeed oo istaraya oo dabeeecad ahaan xil ka saran yahay barnaamijka maaraninta ranjiga naqshadaynta macmiilka kaddib (haraaga). Soo saarayaasha rinjiga aya sameeyay PaintCare, hay'ad aan macaash doon ahayn, si ay u maamusho barnaamijyada xil iska saarista ranjiga ee gobalada leh sharciyada habboon.

Barnaamijka waxa ku jira waxbaris laxiriirta iibsashada qaddarka ranji ee habboon, tallooyinka isticmaalka inta ka harta ranjiga iyo dejinta goobo dib-u-wershadayn daafaha gobolka oo dhan.

## Badeecadaha PaintCare

Badeecadahan waxay leeyihii khidmad marka aad iibsanyaso waxaana loo aqbalaa qubista iyada oo kharash dheerad ah aan lahayn:

- Ranjiyada nashqadeed ee gudaha iyo dibadda: ranjiga biyaha leh, akrilik, biyo leh, alkayd, saliid leh, enemal (oo ay kujiraan dhaadhada qallafsan)
- Dahaadhada dhakada, ranjiyada sagxadda (oo uu kujiro elastometric)
- Buugaagta tilmaanta ah, siilariska, hoos-da haadhyada
- Ranjiga alwaaxyada
- Sheelaakis, aslayaasha, xabagta looxa, yureteynis (hal kujire)
- Shubka biyuhu aanay galin/masanariga/xidhiyaasha qoryaha iyo waxyaalaha rebellantiska ah (maya mid uu kujiro daamur)
- Dahaadhada birta, kahortaggayaasha daxalka
- Ranjiga garoomada iyo daaqa

Dusmada, weelka aan calaamadaysnayn, iyo kuwa madhan lama aqbalayo meelaha lagu dejijo.

## Badeecadaha Aan-ahayn PaintCare

- Qafifiyaha riinjiga, isbiirityada macdanta, dareerayaasha
- Rinjiyada la buufiyo
- Ranjiyada baabuurta iyo gaadiidka badda
- Ranjiyada farshaxanka iyo qurxinta
- Kawl, iboksis, xabagta, iyo ku dhagayaasha
- Wanaajiyayaasha ranjiga, midabeeyayaasha, midabyo kala duwan, xabagaha
- Xafidayaaasha qoryaha (ay kujiraan cayayaan dile)
- Qaybta saqfaka iyo dayactirkha
- Laami, waxsoosaarka daamurku kujiro
- Dahaadh 2 shay ka kooban
- Nadiifiyaaasha dhakada
- Ranjiyada gaadiidka iyo calaamadinta waddooyinka
- Dahaadhada Dayactirkha Warshadeed (IM)
- Ranjiyada iyo qurnxinta Soosaaraha Qalabka Asalka (OEM) (dalabka tukaanka)

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan dib-u-warshadeynta iyo qubista ku haboon ee waxyaabaha aan PaintCare aheyn, fadlan kala soo xiriir gaadiidka qashinka, hay'ada caafimaadka deegaanka, barnaamijka halisaha qoyska ama waaxda shaqooyinka bulshada.



Dib-u-warshadeyn  
LA SAMEE **PaintCare**



# Xageen Geeyaa Rinjiga Hadhaaga Ah?

Dib-u-warshadeynta rinjigu wuxuu ku habboon yahay PaintCare. Waxaan ka hagaajinay gooba lagu qubo rinjiga gobalka oo dhan iyadoo la adeegsanayo sharciyada xeerka masuuliyada ranjiga. Si aad u hesho goobaha qubitaanka ee kuugu dhaw, isticmaal qalabka baaraaha goobta qubitaanka ee PaintCare ee barta [www.paintcare.org](http://www.paintcare.org) ama wac khadka tooska ah (855) PAINT09.

## Sida Dib loogu Warshadeeyo

Goobaha PaintCare waxay aqbalaan dhammaan haraaga noocyada ranjiga ee guriga, ranjiga alwaaxa, iyo xabagta – xiiataa haddii goordhaw la isticmaalay ama sanado badan. Weelku waa inuu yahay mid qaada shan gallon ama kayar, iyo noocyada qaarkood ee ranjigana lama aqbalo. Ka fiiri dhabarka xaashida liiska waxa ay PaintCare aqbasho.

Dhammaan goobaha PaintCare ee lagu qubo waxay aqbalaan illaa shan gallon oo ranji ah booqashadii. Goobaha qaar ayaa aqbala ka badan. Fadlan horay u sii wac goobaha si aad u xaqijiso saacadaha saacadaha shaqada oo aad u hubiso inay aqbalaan qaddarka rinjiga aad rabto in dib loo wershadeeyo.

Hubso in dhammaan weelasha ranjigu ay leeyiin dabool iyo sumado asal ah, uguna rar si ammaan ah gaadiidkaaga haddii aad kaxeenayso. U qaad goobta dejinta xilliyyada saacadaha shaqada. Waxaanu ka qaadi doonaa halkaas.



## Maxaa ku Dhaca Ranjiga?

PaintCare waxay xaqijisaa in ranjigaaga hadhaaga ah dib loogu qaso ranji dib loo warshadeeyay, loo isticmaalo shidal ahaan, laga sameeyo waxyalo kale ama si habboon loo qubo haddii isticmaal kale oo nacfi leh loo waayo.


## Yaa Istimcaali Kara Barnaamijka?

Qoysaska waxay soo qubi karaan rinjiga latex ama kan kusalaysan saliidda maadaama goobta qubitaanka ee PaintCare ay diyaar u tahay inay aqbasho.

Ganacsiyada waxay soo qubi karaan rinjiga latex cadad kasta oo goobta qubitaanka ee PaintCare ay diyaar u tahay inay aqbasho, balse xad ayaa jiri karo haddii uu yahay ranjiga saliida leh. Booqo [www.paintcare.org/business-limits](http://www.paintcare.org/business-limits) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## Ma Aqbashaa Mugga Badan ee Ranjiga?

Haddii aad ku haysato ugu yaraan 100 gallon oo ranji dib loo wershadaynayo gancsigaaga ama guriga, wax naga weydii adeeggeena qaadista xaddiga badan ee bilaashka ah. Fadlan booqo [www.paintcare.org/wixii/faahfaahin](http://www.paintcare.org/wixii/faahfaahin) dheeraada ama si aad u codsato qaadis.



## Khidmada PaintCare

PaintCare waxa maalgaliya khidmadda ay bixiyaan soosaarayaasha ranjigu ee qasaacad kasta oo ranji ah oo lagu iibyo gobalka. Soosaarayaashu waxay u gudbiyaan khidmadda tafaariiqlayaasha, kuwaasi oo markaa ku dura qiimaha ranjiga. Tafaariiqleeyda waxaa lagu dhiirigeliya inay khidmada ku muujiyaan rasiidiyada macaamilisha. Kharashkaasu wuxuu u dhexeeyaa \$0.30 ilaa \$2.45 waxayna ku kala duwanyihin balaca konteenarka iyo gobalka la joogo hadba.

\$0.30 – \$0.65	Weelasha yaryar (tusaale pints & quarts)
\$0.65 – \$1.35	Weelasha cabirka dhexe (tusaale, 1 gallon)
\$1.50 – \$2.45	Cabirada waaweyn ee ilaa 5 gallon

## Maya Deebaaji

Khidmaddu ma aha deebaaji – waxay qayb ka tahay qiimaha iibka. Khidmadda waxa loo isticmaalaa in lagu masruufo kharashyada socodsinta barnaamijka oo ay ka mid yihiin dib-u-warshadeynta, waxbarashada dadwaynaha, shaqaalaysiinta iyo kharashaad kale.

## Nagala Soo Xidhiidh

Si aad u barto in dheeraad ah ama u hesho goobta ranji geynta, fadlan booqo [www.paintcare.org](http://www.paintcare.org) ama wac (855) PAINT09.